**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# KAABISTA IYO WAX KA BEDELKA XEERKA LADAGAALANKA MUKHAADARAADKA (Xeer Lr. 21/2019

**ARAAR**
**Golaha Wasiirada Jamhuuriyada Somaliland**

**Markay Arkeen**; In mukhaadaraadku halis wayn ku yahay amniga dalka, sidoo kalana saamayn taban ku leeyahay koboca dhaqaalaha, akhlaaqiyaadka bulshada iyo dhaqanka suuban ee bulshadeena.

**Markay Arkeen:** In mukhaadaraadku si baaxad leh usoo galo dalkeena sidoo kalana isticmaalkiisu uu aad ugu sii fidayo qaybaha bulshada gaar ahaan da'yarta, kaasi oo keeni kara dhibaatooyin isugu jira amniga, dhaqaalaha iyo akhlaaqda bulshadaba.

**Markay Arkeen:** In xeerka ahada jira aanu dhigayn ciqaab ku filan in lagu xakameeyo soo galintaa iyo ka ganacsiga mukhaadaraadka, sidaa daraadeedn aloo baahan yahay in ciqaab culus oo ku filan la saaro dadka ku kaca soo galinta, isticmaalka iyo ka gagacasiga mukhaadaraadka.

**Sidaas Daraaddeed,** Golaha Wasiiradu waxay kalfaddhigoodii 48aad ku ansixyeen Kaabista Iyo Wax Ka Bedelka Xeerka Ladagaalanka Mukhaadaraadka (Xeer Lr. 21/2019

## QODOBADA WAX KA BEDELKA IYO KAABISTA

**xeerka waxa lagu soo daray Qodobka koowaad oo u dhigan sidan**

**Qodobka 1aad: Magaca Xeerka**
xeerkan waxa loogu yeedhayaa kaabista iyo wax ka bedelka Xeerka Ladagaalanka Mukhaadaraadka (Xeer Lr. 21/2019

**ASBAABTA**

Xeerkii hore ma lahayn qodob dhigaya magaca xeerka, magacuna waa u muhiim xeerka maadaama uu yahay summadda xeerka, marka la xiganayo ay tahay in la sheego magaca xeerka, tirsigiisa iyo sanadka uu soo baxayba.

**Qodobka 2aad**
**MACNAHA EREY-BIXINTA**
Hadii aan aan si kale nuxurku tilmaamin, ereyadan iyo weedhahan waxa loola jeedaa:

**Maandooriye:** waxa loola jeedaa shay kasta oo isticmaalkiisu bedelo xiska aadamaha oo keeni kara sakhrad muddo dheer ama muddo gaaban sifa kasta ha lahaadee.

**Isticmaal Maandooriye:** Waxa loola jeedaa sifa kasta oo loo qaato maandooriye sida cabbid, qiijin, ursasho, turqin irbad ama isku muddis, shidasho, cunid IWM.

**Caadayste:** Waxa loola jeedaa qof kasta oo uu bariinsaday isticmaalka maandooriyaha isticmaalkiisa xeerkan lagu mamnuucay.

**QAYBTA LABAAD**
**DAMBIYADA**

**Qodobka 3aad**
**REEBANAANTA MAANDOORIYAHA**
Beerista, samaynta, ka ganacsiga, soo galinta, haysashada iyo isticmaalka dhamaan maandooriyayaashu way ka reebban yihiin gayiga Somaliland.

Qodobka 4aad oo hore u ahaa qodobka 3aad waxa la kordhiyay ciqaabta farqadaha uu ka kooban yahay qodobku, waxana laga dhigay sidan;

a) ciqaabta farqada 1aad oo ahayd 6 bilaad ilaa hal sano waxa laga dhigay 1 sano ilaa 2 sanadood;
b) ciqaabta farqada 2aad oo ahayd ciqaabta ku xusan faqradda 1aad iyo ganaax dhan 500,000 Sl. Shillin ilaa 1,000,000 Sl. Shillin waxa laga dhigay ciqaabta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, iyo ganaax dhan 1,000,000 Sl. Shillin ilaa 5,000,000 Sl. Shillin
c) ciqaabta farqada 3aad oo ahayd 1sano ilaa 3 sano iyo ganaax lacageed oo dhan 2, 000,000 Sl. waxa laga dhigay 2 sano ilaa 3a sano.

d) ciqaabta faqradaha 5aad iyo 6aad oo ahaa saddex sano oo ann iib lahayn iyo ganaax lacageed oo dhan 1,000,000 ilaa 2,000,000 Sl. Shilling. waxa laga dhigay xadhig dhan 3 ilaa 4 sanadood oo ann iib lahayn.

**Qodobkaasina waxa uu u dhigmayaa sidan;**

**Qodobka 4aad**
**ISTICMAALKA MAANDOORIYE**

1) Qofkasta oo isticmaala maandooriye oo ay Maxkamad horteed kaga cadaato waxa lagu ciqaabta ku xusan shareecada islaamka, iyo ciqaab xadhig ah oo dhan 1 sano ilaa 2 sanadood oo xadhig ah aan iib lahayn.

2) Qofkasta oo ku isticmaala maandooriye meel fagaare ah ama dadweynaha u furan ama sakhrad ku muuja meel fagaare ah ama dadweynaha u furan waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, waxa kale oo loogu siyaadinayaa ganaax dhan 1,000,000 Sl. Shillin ilaa 5,000,000 Sl. Shillin oo hadduu bixin waayo loogu bedelayo xadhig u dhigma.

3) Qofku hadduu yahay mid caadaystay isticmaalidda maandooriyaha waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan shareecada islaamka, iyo ciqaab xadhig ah oo dhan 2 sano ilaa 3 sanadood oo xadhig aan iib lahayn.

4) Caadayste waxa loo aqoonsanayaa qof kasta oo ay maxkamad horteed kaga cadaatey isticmaal maandooriye laba jeer ugu yaraan.

5) Qofkasta oo siiya maandooriye qof da'diisu ka yar tahay 15 sano ama qof xiskiisu dhiman yahay oo ay maxkamad horteed kaga cadaato waxa lagu ciqaabayaa xadhig dhan 3 ilaa 4 sanadood oo ann iib lahayn .

6) Qofkasta oo u qariya ama ku khasba qof kale shay maandooriye ah ama cunto ugu dara ee ay maxkamad horteed kaga cadaato waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan faqradda 5aad ee qodobkan.

**Qodobka 5aad oo hore u ahaa qodobka 4aad waxa la kordjhiyay ciqaabta farqadihiisa oo ahaa sidan.**

**a) ciqaaabta farqadaha 1aad iyo 3aad ee qodobka oo ahayd saddex sano ilaa shan sano oo aan iib lahayn iyo ganaax lacageed oo dhan 3,000,000 ilaa 5,000,000 Sl. Shillin. waxa laga dhigay xadhig dhan (5-15 sannadood) sanadood oo aan iib lahayn**

**Qodobkaasina waxa uu u dhigmayaa sidan;**

**Qodobka 5aad;**
**Ka Ganacsiga, Samaynta, Soo Galinta Maandooriye**

1) Qofkasta oo dalka soo galiya ama beera ama sameeya ama ka ganacsada ama si uun u haysta maandooriye ee lagu helo waxa lagu ciqaabayaa xadhig dhan (5-15 sannadood) sanadood oo aan iib lahayn.

2) Maxkamadu waxay amraysaa in la baabiiyo ama la gubo dhamaan maandooriyihii la qabtay, kii la beeray, qalabkii lagu beeray ama lagu sameeyay.

3) Wadaha gadiidka dalka soo galiya maandooriye nooc kasta oo uu yahay (mid dhul, cir iyo bad) ee ay Maxkamad horteed kaga cadaato waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkan.

4) Gaadiidka lagu qabtay maandooriye ee ay Maxkamad horteed kaga caadaatey waxa marka koowaad lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan 50,000,000 SL Shillin, Marka labaad waxa la ganaaxayaa 100,000,000 SL Shillin, marka saddexaad waa lala wareegayaa.

5) Deganaha guriga (dhismaha) lagu iibiyo maandooriye ee ay maxkamad horteed kaga cadaato waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkan iyadoo digniin qoraal ahna la siinayo marka koowaad mulkiilaha guriga, marka labaad ee lagu helo waxa mulkiilaha guriga lagu ganaaxayaa 2% qiimaha guriga, marka sadexaad ee lagu helo waxa lagu ganaaxayaa 5% qiimaha guriga, marka afraad ee lagu helo waa lagala wareegayaa dhismaha.

**xeerka waxa lagu soo daray qodob cusub oo noqonaya qodobka 6aad waxanu u dhgmayaa sidan;**

**Qodobka 6aad**
**Gacansiinta iyo Ka Qayb Qaadashada Soo Galinta Maandooriye**

Qofkasta oo ka gacansiiya, jidmariya, qariya ama si uun uga qayb qaata soo galinta maandooriye oo ay oo ay maxkamad horteed kaga cadaato waxa uu mutaysanayaa ciqaab xadhig ah oo dhan (5-10 sannadood) oo aan iib lahayn.

**Qodobka 7aad**
**BEDELAAD IYO BURIN**

Xeerkani wuxuu bedelayaa qodobada 411, 412, 413, 414, 415, 416, 417, 342 iyo 343 ee Xeerka Ciqaabta Guud, waxa kale oo uu burinayaa xeer kasta oo ka soo horjeedaa.

**Qodobka 8aad**
**DHAQANGALKA**

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka Barlamanku ansixinayo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland saxeexo faafinta rasmiga ahna lagu soo saaro.